

**Kaalmadaada si khalad ah ayaa loo isticmaali karaa**



Lacagaha la aruuriyo iyo kaalmada shakhsiga, ayaa laf dhabar u ah dhaqaalaha ay ururada samafalka haystaan marka ay doonayaan in ay fuliyaan mashaariicdooda.

Killiyada qaarkood waxaa lacagaha la aruuriya, marka ay jirto dhibaato deg deg, markaas ka dib ayaa la qaadaa olole guud oo lacag aruurun ah.

Laakin marar kale oo badan ayaa lacagaha si joogta ah loo aruuriyaa. Sida ay matalanba sameeyaan ururro badan oo samafal ah marka ay shaqadooda caadiga ah fulinayaan.

Sidoo kale dhaqaale aruurintu waxay ka mid tahay dhaqdhaqaaqyada joogtada ee ururrada , gaar ahaan munaasabadaaha la xiriira diimaha, sida masaajidada marka la tukado salaada jimcaha oo kale.

Waa dhaqan wanaagsan, oo dabcan ay haboontahay in aan laga tagin, oo la xoojiyo.

Hadaba sanadahan danmbe waxaa soo baxay walwal iyo cabsi badan oo laga qabo, in lacagahan la soo aruuriyay qaarkood ay galaan jeebasha ururo si gudbiya, dabaddedna suurta galiya in loo isticmaalo si toos- ama aan toos ahayn -in lagu taageero fal aragagixisinimo.

Walwalkan wuxuu sii xoogaysatay intii ka dambaysay falkii argagixisada ee 11 setember 2001 iyo falalkii kale ee argagixiso ee ka dhacay meelo kaloo badan dunida.

### **Denmark waxay fulisaa go'aamada qaramada midoobay (QM) iyo midowga Yurub (MY)**

Sida wadamo badan oo kale ee dunida , ayay denmark dhaqan galisay qaraarka lambarkiisu yahay 1373 ee qaramada midoobay, ee la dagaalanka aragagixisada iyo waliba axdiga QM ee la xiriira maalgalinta argagixisada.

Ka dib falkii argagixisada ee 11 setember 2001, ayay heshiis ku gaareen wadamada MY in ay si wada jir ah ula dagaalamaan argagixisada. Qaraarka QM iyo heshiiska MY, waxay ka midaysan yihiin qodobada la dagaalanka maalgalinta argagixisada iyo muhimadda ay leedahay in waddan walba uu sharci adag ka sameeyo arrintan.

Aqalka ummadda ( folketinget ) wuxuu ansixiyey in wax laga bedelo xeerka ciqaabta ee denmark.

Isbedelkaas wuxuu ku saabsanyahay arimaha ay ka mid yihiin maalgalinta argagixisada , wuxuuna dhaqan galay 8 juun 2002.

***Sharcigan wuxuu horistaagayaa in lacag la siiyo ama loo xawilo, ashkhaas, ururro , kooxo ama isutagyo , taageera ama ay aragagixisiinimadu ka mid tahay dhadhaqaaqooda.***

Sidaas darted waa in aad ka taxadartaa cidda aad lacag siinaysid ama ku xawilaysid.

**Xeerka ciqaabta §114a, wuxuu adkaynayaa in uu qofku ka taxadaro ashkhaasta, ururada, kooxaha ama isutagyada uu siinayo ama u xawilayo lacag.**

**Si aad u hubsato, waxaad mataalanba baari kartaa :**

- Ururada ama ashkhaasta sumcadooda, taariikhhooda, shar-ciyadooda ama xeerkooda.
- Ururka madaxdiisa, maamulkiisa iyo guddigiisa.
- Ururka ama ashkhaasta hadfkooda samfal.
- Ururka ama ashkhaasta qaabkooda hantidhowr ama xisaab celin.
- Ururka ama ashkhaasta natijadooda samafal.

Si dabiici ah u xogogaalso oo su áalo waydii . Mar walba oo ay wargalintu yartahay, ama aan lagu siin jawaab kugu filan, waa in uu battaa shakigaaaga la xiriira dhaqaalahan ama lacagtan aad u aruurinayso ururkan, shakhsigan, kooxdan ama isutaggan.

Haddii uu shaki ku galo, waxaad ka ogaan kartaa ama ka baari kartaa, in ururkan ama shakhsigan aad doonaysid in aad taageer-tid ama aad lacag u aruurisid, in uu ku jiro liiska dawliga ee MY ee argagixisada.

## Waa dambi ciqaab mudan:

- In aad lacag siisid shakhsi, urur, koox ama isutag, taageera ama ka qayb qaata falal argagixisnimo
- In aad lacag u aruurisid shakhsi, urur, koox ama isutag taageera ama ka qayb qaata falal argagixisinimo
- In aad dayn uga qaadid bangiga ama shirkadaha maalgalinta bixiya shakhsi, urur, koox ama isutag taageera ama ka qayb qaata falal argagixisninimo.
- In aad taageertid mashaariic si toos aan ahayn qayb uga noqon kara dhismaha qalab koox aragagixiso
- In aad taageertid mashaariic samafal, oo si toos aan ahayn u tageera dhadhaqaaq aragagixisnimo
- In aad ugu adeegtid koox aragagixisa ah waxyaabaha ay ka mid yihiin , lacag, dhaqaale, kooonto bangi ama qalab kale

